



Sibtambar 9, 2020

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Waxaan rabaa in aan dadka la wadaago ilo ay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka iyo qoysaskooda, iyo sidoo kale Barnaamijka Naafanimada Korriinka Bulshada (CDDP), Hay'adaha iyo daryeel bixiyayaashu, laga yaabo in ay rabaan in ay wax ka ogaadaan.

Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa Juun sii daayay ku dhawaaqista deeq lacageed oo la siinayo ururada ku saleysan bulshada (CBO) si loogu taageero adeegyada dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba wax jawaabta u noqonaya isaga oo qayb ka ah jawaabta gobolku ka bixinayo COVID-19. Deeqdan lacageed waxaa loogu talagalay bulshooyinka ay ka mid yihiin, balse aanay ku koobnayn: dadka midabyada kala duwan leh, dadka naafada ah, dadka qaba dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka, bulshooyinka muhaajirka iyo qoxootiga ah, bulshooyinka caqiidooyinka diimeed leh, bulshooyinka aan sharciga lahayn iyo shaqaalaha beeraha, dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka, dadka waaweyn iyo LGBTQIA+ bulshooyinka.

OHA ayaa in ka badan 170 oo ah CBO-yada ku maalgelisay \$9.4 milyan oo ah lacagaha CARES Act guud ahaan gobolka, oo ay ku jiraan ururada taageerada dadka naafada ah. Liiska CBO-yada la maalgeliyay waxaa laga heli karaa:

<https://www.oregon.gov/oha/PH/ABOUT/Pages/Community-Engagement.aspx>

CBO-yada waxaa loo maalgeliyay in ay ka shaqeeyaan mid ama ka badan oo ah dhinacyada saddexda ah ee soo socda:

- Ku lug yeelashada iyo ka qayb galinta bulshada

- Baaritaanka la xiriira ka ag dhawaanshaha qof cudurka qaba 'contact tracing' oo si wadajir ah loola sameynayo maamulayaasha caafimaadka dadweynaha ee degaanka; iyo
- U fidinta dadka ee adeegyada bulshada/taageerooyinka buuxa ee loo baahan yahay.

Dadka ka tirsan nidaamkayaga adeeg, oo ay weheliyaan hay'adahayaga maamulka kiiska, waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay la xiriiraan CBO-yada maxalliga ee ka jira degaankaaga haddii loo baahdo taageerooyin.

Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad sameynayso si aad naftaada, qoyskaaga iyo dadka reer Oregon ee qaba I/DD uga dhigto kuwo badbaado qaba inta lagu jiro wakhtigan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.